

Sharciga L. 16 - 27^{ka} Juunyo 1958

Dheereynta muddo-xileedka Golaha Xeerdejinta Soomaaliya ilaa 31^{ka} Luulyo 1958.

MAAMULAHA

Markuu arkay oggolaanshaha Golaha Xeerdejinta;

WUXUU GUDDOONINAYAA SOONA SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1

Muddo-xileedka Golaha Xeerdejinta, ee ku xusan Amargooyada lamba. 1, ee 5^{ta} Jannaayo 1956 waa la dheereeyey ilaa 31^{ka} Luulyo 1958, ayada oo uu ku sugnaanayo isbeddelka lagu sameeyey, sí waafaqsan amarka ku xusan Amargooyada 31^{ka} Maarso 1955, lamba. 6.

Qod. 2

Sharcigan waxa uu dhaqangelayaa 1da Luulyo 1958. Sharcigan waxaa la gelinayaa Ururinta Rasmiga ah, ee sharciyada, waxaana lagu nashrinayaa Faafinta Rasmiga. Qof kasta, oo ku gudboon, waxa khasab ku ah in uu dhowro kuna khasbo in loo dhowro sida sharci Soomaaliya leedahay.

Taariikhda Muqdisho maanta oo ah 27 Juunyo 1958.

Ku-Simaha Maamulaha

Piero Franca

Wasiirka Kowaad

Cabdullahi Ciise Maxamuud